

“Mudnaanteyda ugu koowaad waa hubinta badbaadada iyo faydada qabka ardaydeena iyo macalimiinta.”

Salaamo Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb,

Isbuucaan wuxuu ahaa isbuuc kaloo wax soo saar leh inaga oo sii wadeyno inaan u diyaar garowno sannad dugsiyeedka 2020-21.

Kuwa badan oo idinka ah waad ogtihiin shaqalaha maamulka oo waxaan soo bandhigay qorshaha dib u furida Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb (DCSD) oo sannad dugsiyeedka inta lagu jiro Luuliyo kulanka 13 aad ee Guddiga Waxbarashada. Inta lagu jiro kulanka, Guddiga wuxuu ku heshiiyay inay dib u dhigaan bilowga sannad dugsiyeedka illaa Agoosto 17, oo ku furaan dugsiyada nooca waxbarashada fogaanta/onleenka si loo tixgeliyo faafida hadeer ee la taaban karo ee COVID-19.

Qorshaha Degmada waxaa lagu dhafay hagida hadeer ee ka imaaneyso jaalal kala duwan, oo ay ku jiraan Waaxda Caafimaadka Bulshada Georgia, Guddiga Caafimaadka Gobalka DeKalb, Xarumaha Xakameynta iyo Ka hortaga Cudurka (CDC) iyo Waaxda Waxbarashada Georgia (GaDOE). Jawaab celinta bulshada ee ka timid sahanka tallada daneeyayaasha, taas oo soo saartay 39,574 jawaabo ka imaaneyso waaladiinta, ardayda iyo shaqaalaha, sidoo kale la ogeysiisay qorshaha.

“Iyada oo la tixgelinayo faafida la taaban karo ee aageen hadeer, waxbarashada onleenka waa dooqeena ugu wanaagsan, laakin dib ayaa loogu qiimeynayaa si bil-le ku saleysan. Waxaan hormarineynaa badbaadada aqoonyahanadeena iyo shaqaalaha, dhammaan inagoo joogteyneyno filashooyinka sare oo guusha ardayda iyo raaxada barida iyo barashada.

Waan ku faraxsanaa inaan helo fursada looga hadlayo qorshaha iyo shaqada cajiibka ah ee kooxdeena inta lagu jiro Kulanka Onleenka Kormeeraha guud ee Wada sheekeysiga Dastuurka-Joornalka Atlanta ee Luuliyo 15. Waan u mahad celinayaa qof walba ee ka daawaday Facebook iyo YouTube oo jawaab celin ka bixiyay. Aad ayaan ugu faanayay inaan matalo DCSD!

Sidoo kale isbuucaan, waxaan booqday dugsiyadeena cajiibka ah ee Region III oo Maalinta Dalxiiska. Kadib booqashada dugsiyada iyo la kulanka macalimiinta, aad ayaan ugu dhiiranaa iskaashigooda xoogan ee qoysaska! Jaalalkaan xoogan waxay cadeeyeen in wadajirka aan wanaagsannahay.

Waad mahadsantahay Kormeeraha guud ee Goboleedka Dhaqtar Sean Tartt oo diyaarinta kulamada ka qeybgelinta qoysaska, aqoonyahanada, macalimiinta iyo maamulayaasha. Waxay dhammaantood bixiyeen soo jeedin weyn oo ku caawineyso ogeysiinta qorshooyinkeena ku laabashada dugsiyada iyo dib u gelida.

Ugu dambeyntii, waxaan sidoo kale helay fursada lagu booqanayo Xarunta William Bradley Bryant iyo Xarunta Diiwaangelinta Onleenka ee Luuliyo 16. Waxaan la booqday xarunta Sarkaalka Madaxa Ku meelgaarka ah ee Warbixinta Monika Davis si aan wax badan uga barano Qeybteena Cilmiga farsamada Warbixinta. Waxaan la dhacay shaqada IT ga ay sameynayaan si loo hubiyo in ardaydeena iyo shaqaalaha ay joogteeyaan filashooyinka waxbarashada oo dhinaca helitaanka cilmiga farsamada tayeysan.

Sidoo kale waan ku faraxsannahay dadaalada wadajirka ah ee Diiwaangelinta Onleenka/Maareeyaha Diiwaanada Petra Boerner, Monika Davis iyo Dhaqtar Vasanne Tinsley, ku xigeenka kormeeraha guud ee Taageerada Ardayda iyo Waxqabadka, si loo xoojiyo diiwaangelinta onleenka iyo adeega macmiilka ee qoysaskeena. Shaqada kooxda waxay ka shaqeysiisaa riyada!

Waxaan rajeynayaa inaan wax badan la kulmo shaqaalahaheena cajiibka ah iyo xubnaha bulshada inaga oo u sii diyaar garoobeyno sannadka dugsiyeedka 2020-21. Ku raaxeyso dhammaadka isbuucaaga oo badbaado ahow!

Daacadnimo,

Cheryl Watson-Harris, Kormeeraha guud